Kamkamkii kalluunka

"Sheeko Gaaban"



AW DACAR

Kamkamkii Kalluunka

"Sheeko Gaaban"

Aw Dacar

©Copyright 2022 Aw Dacar

©Cover page The tragedy by Maxamed Shariif
Designer and writer.

1

Waa ay is gaabisay, oo qunyar shafka gariiraya dhulka dhigtay. Qabowga iyo qallafsanaanta daran ee dhulka ayay dareentay, se dan ka ma aysan galin ee waa ay isku nabtay, illaa ay kamid noqotay dhulkii. Wallow ay soo orodday, haddana waxay isku hawshay in hinraageeda iyo hugunka laabteeda ay xakamayso. Sida ilmaha qaylinya naaska loogu aamusiiyo, ayay dhug-dhugta wadnaheeda ciidda ku aamusiisay.

Dhaqdhaqaaqa xubnaheeda iyo neefsigaba waa ay joojisay. Indho didsan oo baqanaya ayay horteeda ku eegtay. Waa barta ay sanqadha iyo urta ka dareentay. Waxba se waa ay arki waydey. Wallow uu mugdi iyo ilays la'aan dhulka ka jiray, haddana taasi kama qarin, kama na hor istaagin. Mugdiga waa ay ba

ku shaqaysataa. Cawska iyo caleemaha ku meegaaran ee ay dhexda kaga jirto, ayay u sababaysay wax arag la'aanta.

Iyada oo sanqadhtiranaysa oo sidii u dhabbacan ayay sida askari dagaal ku jira suxullada ku guurguuratay. Goortii ay gaadhay goobtii ay wax ka arki kartay waa ay joogsatay. Oo hadda si waafi ah ayay wax u dhugan kartaa.

Xididdadii indhaha iyo xubnihii jirka ee baqdinta isugu soo aruuray ayaa kala furfurmay. Neeftii iyo wadnihii ay xakamaysayna dib ayay u fasaxday. Beerka iyo boga oo goorahanba dhulka kamid ahaa ayaa sidoodi dib ugu noqday. Farxad ayayna la sara kacday.

Waxa ay garatay wixii horteeda ka muuqday. Wixii sanqadhayay ee u soo shiiray ayay aqoonsatay. In kasta oo aysan xilligan uga baran, haddana in uu

isagii noqdo ayay aad ugu faraxday. Xaskii jikada ku ag yaallay ee ay ku dhex jirtay ayay si tartiib ah uga soo sara kacday dhankiisana aadday. Dhankii sanqadha iyo siifadda.

Gaajo iyo harraad daran ayay kax la tahay, in la'eg ama ka badan ayay sida oo kale ruuxdana ka baahan tahay. Hamuunka ay cunnada u hayso, waxaa ka daran hilowga ay isaga u qabto. Saddex caano-maal indho ma aysan saarin. Haddana araggiisa filan-waa ayuu ku noqoday.

****

2

Caawa waxbaa ka si' ah. Sidii lagu yaqaannay ma aha. Isaga kaliya ma aha ee cimilada iyo cirkuba in ay wax ka khaldan yihiin ayuu u arkaa. Iyaga kaliya maahee wax walba oo ku hareeraysan waxbaa ka khaldan. "Horta cirku caawa foolxumaa!" ayuu hoosta iska leeyahay. Habeenno ayuu arki jiray cir buluuggan oo caad ka saafi ah, iyo xiddigo tiro beel ah oo aad u dhalaalaya. Mararka qaar, waxa uu daawan jiray dayaxa oo ay ku meegaaran yihiin xiddigo si xarrago leh daruuro cadcad oo khafiifa u dhex-jibaaxaya.

Jilaa Hindi ah, oo istaafkiisu ku hareeraysan yihiin oo mawjado atariishooyin qurqurux badan dhexqaadaya ama ay daba iyo hor marayaan ayuu ku masaali jiray. Sida uu tusaalaha ula helay ayuu ka yaabi

jiray, oo kaligii iska qosli jiray isaga oo isku camiraya. Deganaanta habeenka iyo ashqaraarka cirka ayuu ka yaabi jiray oo habeenno iyo habeenno aamusnaan ku qaadan jiray.

Caawa se cirku cirkii ma aha. Quruxdii uu ku yaqaannay na ma leh. "Oo waxan oo foolxuma ahi miyay u qarsoonayd?!" ayuu iswaydiinayaa. "Oo wixii qurux iyo shaamareer ahaa meeday?" ayuu mar kale hoosta ka yiri. Daruuro yaryar, madow iyo cadaan isugu jira oo sanka isku wada haya ayaa cirkii isku fidiyay.

Gashaanti samays xun oo caawa naashnaashkii ay marsan jirtay caawa soo illowday ayuu barbar dhigay. Kuma se qancin. Gashaanti si qarriban bootar aan midibkeeda loo gu tala-galin soo marsatay, oo wajigeedii dhammaa bar madow iyo bar cad wada noqday — sidii lax dambas ku kuftay ayuu mar kale ku masaalay. Qosol dheer ayuu ku dhuftay. Waxay u

muuqataa inuu u riyaaqay tusaalaha dambe, oo uu ku qancay.

Saacad ayuu jikada dhex fadhiyaa. Kayse, kaakigii uu saaka gashaday oo magaalada kusoo galay ayuu weli ku taagan yahay. Shaadh qallafsan iyo surwaal jeermisa ayuu xidhan yahay. Labo hoos-gashi oo aan dhaaminna waa ay uga hooseeyaan.

Muuqaal ahaan; waa barbaar dhuuban oo midabka dubkiisu yahay madow furanaa ee Soomaaliga lagu yaqaannay. Timo madow oo jilcsan iyo sandheer ayuu Alle ku qurxiyay. Indho godan oo ay ku yaryihiin xididdada naxariista ayaa meel fog ka soo muuqda. Kolka laga soo tago waxbarashadiisa dugsiga sare, ma jirto wax wacyi iyo wacdaro kale oo uu leeyahay. Gelinka hore iskuulkiisa, ka dambana kubbadiisa. Gabbalku marka uu dumo, waxa uu fiidkii la caweeyaa saaxiibbadiisa. Mararka qaar waxa uu ka door bidaa eryashada gashaantimaha la ayniga ah.

Sida caadiga ah marka uu guriga soo galo qolkiisa ayuu ku horreeyaa si uu u soo beddelo dharkii uu suuqa ku xuurraamayay. Deedna wixii jiniinkiisa maraya ayuu u hollan jiray. Se caawa kolka uu kadinka kasoo galay jikada ayuu hor galay. Gaajo kama aha, oo waa kan saacad isaga dhexjira isaga oo aan weli afka wax saarin. In uu xanaaqsan yahay, in laga soo xanaaqay, inuu cabsanayo, in laga cabsanayo, in uu warwarayo, iyo in laga warwarayo ka ay tahayba waa kaa isla aamusan ee ku dhaygagsan birjikada dansan ee hortiisa taalla.

Digsi daallan oo dabku dabadiisa madoobeeyay ayuu gacanta la tiigsaday. Daboolka ayuu ka fayday, waa bariis. Isaga kaligii ayaan cashayn, oo reerka intiisa kale waa casheeyeen. Waxa uu ka fekeray inuu saxan ku rito iyo in uu digsiga faraha la galo. Int uu hamaansaday ayuu ta dambe qaatay.

Gasacad kalluuna uu sitay ayuu daahdhkii sare ka fiiqay. Saliiddii ka soo horraysay kalluunka ayuu

inteedii badnayd dhulka isaga qubay, oo afka digsiga u wada galiyay kalluunkii. Markiiba jiq jikada ku agtaallay ayuu jabaq ka dareemay.

Waa uu eegay. Wallow ay mugdi ahayd, haddana wuxuu arkay hummaag xayawaan oo sii dhabbacanaya. Dan iyo heello kama uusan galin ee cunnadiisii ayuu faro aan loo faraxalin iskala galay. Kolkii uu dhawr mar cantoobsaday, oo bishimo aan bisinka qabanin ku daboollay, calooshana u sii diray ayuu arkay hummaagii jiqda iyo xaska dhabbacsanaa oo sare kacay. Garay! Waa Bisaddiisii! Shaki la'aan waxa ay soo raacday sanqadhiisa iyo urta kalluunka.

****

3

Intii aysan gaarin ka hor — ayaa sidii oo ay shaqo badan qabatay oo ay daal naf la tahay isku kala bixisay barxad yar ee isaga ka sokaysa. Afarteeda addin ayay horay iyo gadaal u kala jiiday oo jimicsatay. Deedna qunyar caadi iska dhigtay oo dhankiisa aadday.

Hamuunta ay kalluunka u qabto waxa kaga darnaa hilowga ay kubkiisa iyo gacan salaaxiisa u hayso. Kolkay soo gaadhay ayay sidii maskii lugaha isaga martay iyada oo ursanaysa iskuna xoqaysa. Urtaas iyo isku xoqaasi diirrimaad, degganaan, iyo dugsiinno ayay u tahay.

Kayse, sida ay ka filaysay ama ay ka baratay madaxa gacanta uga ma salaaxin. Intuu“Bis” yiri ayuu iska durkiyay, oo cunnadiisii iska sii watay. Bar go’ ayay dareentay oo mar kale lugaha isaga martay. Kayse oo dareemay inay bisaddii mar kale soo laabatay ayaa lugtii ay ku marnayd isaga riixay oo isaga riixay, haddana ku waabiyay oo ku waabiyay illaa uu iska fogeeyay.

Ujeedkeedu waxa uu ahaa in marka hore baahida ruuxda ay quudiso oo weheshato urtiisa, isku xoqa jidhkiisane ku waraabiso. Ruuxdii dhaxanta, cidlada, kelinimada, roobka iyo mugdigaba la deris ahayd saddexdii habeen iyo maalin ee uu guriga ka maqnaa.

Intaa kadibna jidhka ku quudiso kalluun ama hilib, iyo wixii uu siiyaba cunto. Labo jeer oo kale oo ay isku dayday inay hoosta ka gasho wuu iska eryay. In ay caawa wax khaldan yihiin oo sidii hore Kayse ahayn ayay dareentay.

Haqab-tirka ruuxda in aysan caawa suurogal ahayn ayay sida oo kale istusisay, oo u hollatay dharjinta caloosheeda mar haday ruuxda suurogaliwayday. Inta ay si qumman meel ku agdhow isu qotomisay ayay catow ay cunto kaga dalbayso, siiba kalluunka ku bilowday. "Miyaw! Miyaw! Miyaw!" Kayse, inuu wax u tuuro ama meel u dhigo daaye dhankeedaba ma uusan eegin.

Intay yaabtay ayay kusii durugtay oo lugteedii si debecsan ku soo jeedisay sidii oo ay lee dahay "War maxaa caawa kaa khaldan?". Bal maxaa ku watay! Bal maxay hoosta uga gashay, bal maxay u taabatay! May meesheeda ka yawyawlayso, hadduu siiyane aragto haddii kalena isaga tagto.

Kayse oo malaha dulqaadkii ka dhamaaday oo sugi la'aa fursad uu bisadda ku helo ayaa bahal laada shafka iyo madaxa kala helay. Kolka laga tago awooddiisa oo uusan waxba kala reeban sida oo kale waxa uu xidhnaa buudh adag.

Iyada oo aad mooddo fallaar la ganay ayay kadinka jikada meel alaabtii lagu casheeyay ku filiqsanayd ku dhex dhacday. Markiiba waa ay dawaaqday oo iskala garanwayday. Jug culus ayaa madaxa iyo dhinaca midig ka gaartay. Qayli ayay maagtay se naqaskii ayaa ku dhagay. Sidii oo ay nafta hayso ayay afka kala waaxday, oo hawo xoog ku raadisay. Weli se hawo hagaagsan ma aysan helin. Kac oo carar oo meelahaa hawo iyo nefis u raadso ayay maagtay. Se taana waa ay kari wayday, lug iyo dhinacba way dhaqaajin wayday.

Waxay xaqiiqsatay in dhaawac culus uu soo gaadhay. Way ilmaysay. Illin aan dhawaaq iyo cod wadan. Ilmadu kala xanuun badan. Dhawaacuna kala daran. Inaad hoos u ooydo ama codba iska waydo waxay lamid tahay dakhar madaxa kaaga dhacay oo dhiig maskaxda ku furmo, halka ay ahayd inuu banaanka u soo burqado. Dhaawaca sokeeyaha ama wehelkaaga kuu gaysto waxay lamid tahay adiga isdooxay.

Bisiddii kolkan ilmadii waa ay joojisay. Maya e waa ay ka dhamaatay. Iskeed ayay ilmadii isaga istaagtay. Halkii ay ku dhacday ayay si qaabdaran weli u taallaa. Weli sidii ayuu naqaska uga xiran yahay. Indhaha ayay caddaynaysaa marna Kayse ayay eegaysaa oo caawimaad ka rajaynaysaa.

Haddii ay kari karto afkeeda dhareerka iyo dhiiga ka da'ayo ayay kala furi lahayd oo hadal u hollan lahayd. Haddii ay u hollatana, waxa ay galabsatay ayay waydiin lahayd. Sidan hadduu u galayo, sababta duhurkii u horraysay ee carruur dhagaxa hurdada kaga toosiyay uga celiyay ayay waydiin lahayd.

Damiirkii duhurkaa u damqaday waxa caawa iska beddelay ayay wax ka su'aali lahayd. Sababta uu naxariista markii hore ugu muujiyay, mar hadduuba nacaladdan isu beddelayo ayay waydiin lahayd.

Waxay u qaadan la'dahay Kaysihii laabta ku qaadan jiray in uu caawa wax ku ag raamsanayo iyada oo naqas iyo jug culus la kici la'. Jugta jidhkeeda soo

gaaray midka ruuxda ayaa ka daran. Kayse, waa Aadanaha kaliya ee ay aamintay xilli iyada oo yar ay dugaag iyo dadba isku dayeen inay dilaan.

****

4

Waxay xasuusataa iyaga oo afar ah oo hooyadood qadhaab uga maqan tahay in duul is eryanaya dul mareen. Waa ciyaal iska ciyaarayay. Afartii dhasha ahayd ee ay kamidka ahayd labo kamida ayaa dhimatay. Markay labadii kale qayliyeenna carruurtii ayaa ku soo jeesaday oo dhagaxyo la dhacay, sidii oo ay dhashu sinaysteen.

Iyadu waa ay yarayd. Isbuuc ayay dunida joogtay, haddana sidii oo ay bilo joogtay orodyahanad na tahay ayay cagaha wax ka dayday. Falsafadda tiraahda *naftu orod bay kugu aamintaa* ayaa si dabiici ah ugu tolnayd. Iyada mooyee tii kale halkii ayay ku qudh-baxday.

Maalintaa wixii ka dambeeyay nolol silac, saxariir iyo hooyo la'aan ah ayaa u billawday. Xaafadda uu qaddarku dhexgeeyay kuma oollin kawaan iyo barkulan ay bisaduhu ku kulmaan. Middaas oo silicii u sii labanlaabtay. Haddii aan maalin la dakhrin, maalinta xiga ayaa la dakhri jiray. Sida qofka xanuunka la nool uu jidhkiisa wada irbado u noqdo ayay iyaduna jidhkeeda wada nabar iyo dakhar u noqday.

Waxay ciidda, caleemaha iyo hambada dadka soo daadiyaan cunto, mararna baahi iyo bahdilaad isaga seexato oo dadka iska ilaaliso, ayaa habeen saqdhexe iyada oo surin madow badhtankii si taxaddar leh u maraysa dhawr Xoor oo xanaaqsan horay iyo gadaal kaga yimaaddeen. Habeenkaa xag Alle uun bay ka noolayd. Xag Alle uun bay ka badbaaday. Lug ayay jiidaysay, madaxuna wuu dhiigayay kolka ay luuqa baas iyo afartii xoor ka soo baxsanaysay.

Habeenkaa ayay qorshaha ku darsatay kaliya in aysan dadka iska ilaalin ee sida oo kale dugaaggana

iska ilaaliso. Ma aysan jirin bisad ay saaxiibaan, si ay waayaha dunida ee arxanka daran isaga dugsadaan. Dhawr mar ayay curri kulmeen isaguna wax aan hammo iyo galmo ahayn uma uusan soo bandhigin.

Waxay silicaaba isaga noolayd ayaa duhur duhurrada kamida sidii caadada u ahayd iyada oo geed hadh weyn iskaga harsanaysa ayaa carruur soo agmareen. Horay ayay ka boodi lahayde, hurdo dheer ayay ku jirtay. Labadii habeen ee u dambeeyay ayay bahalo iyo baahiba ka seexan wayday. Hambo yar oo ay geedkan harka macaan ka heshay kolkay isku hubsatay ayay harsi iyo hurdo u hollatay, deedna hurdo macaan oo aysan waayadan arkin gashay.

Mid habaarqabe ah oo carruurtii soo agmartay kamid ahaa ayaa arkay bisada huruda. Deedna si uu saaxiibbadii ugu caddeeyo in uu shiishyahan yahay ayuu dhagax qaatay. Inta karaankiisa intuu iskala jiiday ayuu mukulaashii ku hal-gaaday. Dhagaxii oo

maqiiqan ayaa bisadii oo huruda bawdada kaga dhacay.

Qaaaq! Kol qudha ayay hawada u haadday, oo geedkii ay hadhsanaysay madax la heshay. Iyada oo jug iyo jahwareer kii hore ka daran la soo laabatay ayay dhulka si qaab daran ugu dhacday. Waxay garanwayday balaayadu barta ay uga timid! Sidii wax dardaran ayay iska daba wareegtay.

Carruurtii ayaa kol qudha qosol iyo qaraaxo la kala daatay, oo habaarqabihii ugu hambalyeeyay shiishyahannimadiisa. Ku kale oo ka masayray hambalyadaa ayaa u holladay dhagax qaadasho si uu isaguna u caddeeyo inuu shiishyahan kale yahay. Qosolkii ayaa la joojiyay oo la isu daayay bisadda weli sidii isaga daba wareegaysa iyo basharkan iskala jiidaya. Nasiib wanaag iyo nasiibdarro ka ay tahayba inta uusan tuurin ayaa barbaar luuq kasoo baxay.

Waa Kayse oo iskuulkiisii ka yimid. Waxa uu arkay bisaddan dhibban iyo carruurtan dul taagan.

Markiiba wuu kala eryay deedna socodkiisa iska sii watay. Walow aysan wajigiisa si fiican u arkin, laakiin waxay dareentay inuu wali dunida joogo noole iyada u damqanaya. Waxay jeclaysatay inuu horay u wato, Inuu horay u kaxaysto, hadduu doono addoonsado oo lahaado, kaliya dadkan iyo dugaagga uun inuu ka celiyo. Se taasi ma aysan dhicin iyaduna markiiba ma aysan dabagali karin xaaladda jahwareer ay ku sugnayd awgeed.

Iyada oo ay xaalkaa isaga noolayd oo meelaheeda isaga qaadhaabata oo silac adduun u yarayn, ayaa habeen habeennada kamida, xilli fiid dambe ahayd wax u soo kamkameen. Guri ay gidaarkiisa hoos maraysay ayay wax uga soo shiireen. Waxa uu ahaa kamkam Kalluun! Ur kalluun oo aad udgoon ayaa sankeedii saaqay. Markiiba gidaarkii ayay fanatay oo u dhacday gurigii. Barbaar feera qaawan oo jikada ku cashaynaya ayay ugu tagtay. Waxa uu xidhnaa macawis sarando ah, waxa uuna u muuqday mid uu jawigiisu markaa wanaagsanaa.

Dhawr jeer markay ku catawday ayuu in kalluuna siiyay. Ilbiriqsi ayay ku leeftay. Barbaarkii oo ka yaabay baahida bisada ayaa in kale oo intii hore ka badan siiyay. Way laastay. Haddana in kale ayuu u dhigay, si lamida ayay u dhammaysatay.

Barbaarku waa u dhigaa, bisaduna waa leeftaa. Kolkay dharagtay ayay wajigiisa eegtay. Waxa ay ka fekertay noolihii badbaadiyay duhurkii iyo midkan caawa wax siiyay waxa ka dhaxayn kara. Waxay qorshaha ku darsatay inuu jiro noole labaad oo u diirnaxa. Ogaalkeeda oo yar awgii ma aysan garan inuu qofkan yahay isla qofkii duhurkii badbaadiyay. Kayse, Kayse Faarax Aw Geedi.

Sidii ay habeenkaa Kayse iyo gurigaa u baratay waxay ka nasatay gaajadii iyo harraadkii joogtada ahaa ama maalmo xidhiidhsanaan jiray. Waxa ay isku beegtaa xilliga uu casheeyo, waxayna baxdaa goorta ay dheregto. Habeen habeennada kamida ayaa iyada oo

kalluun uu hoostii dhigay cunaysa ayuu gacan qabow madaxa iyo dhabarkeeda ugu salaaxay.

Markiiba jiririco ayaa ku jajabtay, heer ay joojisay cunidda kalluunkii. Degganaan iyo macaansi aysan abid dareemin ayaa jidhkeeda wada saaqay. Habeenkaa wixii ka dambeeyay wehel ayay ka dhigatay, illaa markii dambe ayba gurigiiba soo degtay.

Nasiib wanaag carruur guriga kuma noolayn. Se hooyadii oo ay maalin caano ka daadisay ayaa la collowday. Kasha, hiifitaanka, iyo halgaadda ay habartaas kala kulanto gacanta macaan ee Kayse iyo kalluunka uu siiyo ayay ku illoowi jirtay.

Marba marka ka dambaysa wehel ayay ka dhiganaysay illaa ay u gudubtay inay seexato sariirtiisa markuu maqanyahay iyo markuu joogaba. Codkiisa ayaa ay ka baratay codadka dadka kale, xataa garaaca albaabka ayay ka taqaannaa kuwa kale. Kolka uu sidaa kadinka uga soo galo, inta ay iska fiiriso islaanta, haddii aysan u jeedin, ama gurigaba joogin dhankiisa

ayay u ordi jirtay, iyada oo farxad iyo raynrayn ku soo dhawaynaysa. Isaguna laabta ayuu ku qaadi jiray, illaa uu aqalka la galo. Deedna qunyar dhulka dhigi jiray.

Inta uu dharka iska beddelayo lugaha ayay isaga mari jirtay iyada oo jidhkiisa ay isku xoqayso, diirrimaad iyo degganaan ka raadsan jirtay, marmarna dhulka ayay is daadin jirtay iyada oo dhabar-dhabar u jiifta oo boggeeda iyo beerkeeda jilicsan dhankiisa ku soo liishaysa. Middaa waxaa ay ku caddayn jirtay kalsoonida buuxda ee ay isaga ku qabto. Inta badan bisaduhu kolka ay dhiillo dareemaan ama ay joogaan goob aysan ku kalsoonayn bogga ayay dhulka u dhaweeyaan ama ku nabaan, waayo? Waa halka ay u jilcan yihiin.

Kayse, waxa uu u ahaa nolol. Waxa uu u ahaa daaqadii ay daryeelkiisa sida iftiinka uga aragtay. Waxa uu u ahaa xarigii ay kaga soo baxday haadaantii madoobayd ee ay maqaadiirtu dhexdhigtay. Waxay isku qancisay badhaadhihii iyo barwaaqadii ka

awdanayd in imika loo fasaxay. Waa ay ka raysatay diiftii, diihaalkii, iyo darxumadii ay ku noolayd.

Sida uu xaal sidaa u ahaa ayay mar qudha Kayse waydey. Saddex habeen iyo maalinkoodii. Iyada se dhankeeda markaa sanooyin ka ahaa. Gaajo, harraad, cidlo, hilow, roobab ayay dib ula deristay. Dhawr jeer oo ay shanqar jikada ka dareentay oo Kayse u malaysay, oo ay u soo oroday ayaa kal haadaysaa ka hor timid. Waa Kayse hooyadii oo jikada ku jirta.

Kol uu hilow, iyo kelinimo googooysay, oo soo xasuusatay waayaheedii hore ee qadhaadhaa ayaa habeen xilli dhulku mugdi yahay, oo korontadu maqan tahay jikada ka maqashay sanqadh. Islaantii inay tahay ayay isku qancisay. Se, kolka uu Kalluunkii u soo kamkamay oo sankeeda ku saaqay ayay garatay inuu Kayse yahay ka jikada ku jira, haddana ka shakisay in ay islaantii tahay.

Waa tii soo oroday ee kadinka jikada bareeg ku qabatay. Hubsasho awgii waa tii dhex dhabbacatay cawska iyo caleemaha is dhexgalay ee jikada ka agbaxay. Waa tii indhaha ku baniinisay noolaha jikada ka sanqadhaya, ee kolka ay hubsatay in uu Kayse yahay kor u boodday farxad awgeed oo dhankiisa u orodday.

Xusuustaas dheer ee qaraarka, iyo macaanka isugu jiray ayay ilbiriqsiyo sidii cajaladii isugu bedbedeshay.

****

5

Caawa waa ay aamini la'dahay Kaysahani inuu Kaysihii yahay. Wehelka iyo noolaha kaliya ee ay dunida ka haysatay inuu dhaawacan u gaysan doono marnaba kaskeeda ma soo galin. Habaarqabihii duhurkii hurdada dhagax kaga kiciyay iyo Kayse farqiga u dhaxeeya ayay ka fekertay, In aan waxba u dhaxayn ayaa u soo baxday.

Wax kasta billawgii ayaa laga baaqsan lahaa, haddii la sii ogaan lahaa dhammaadka, iyadu ogaal ba ma laha oo maba taqaanno waxa socda iyo sida ay u socdaan. Marka cidi dhibaataysana ma waydiin karto sababta ay ugu gaysatay, waayo? Maba hadli karto.

Dareen ayay isticmaashaa marka ay rabto in ay dadka la xiriirto, qof aan qalbigiisu foorarin ayuun baa

dareemi kara. Kayse qalbigiisu caawa miyuu fooraraa? Dareemihii uu ku qaabbilay duhurkii dhagaxa hurdada looga kiciyay iyo habeenkii u horraysay ee ay baahi la hoos yuusaysay, caawa miyay ka maqanyihiin? Xaggee bay ka aadeen? Mise kaliya muudhkiisa ayaa markaa saxsanaa se, caawa qarriban?

Waa caado nacladan oo uu leeyahay. In dareenkiisa iyo noolaha kale uu is dhexgaliyo. In uu si qumman oo qiimo leh kuu la dhaqmo waxa ay ku xiran tahay hadba muudhkiisa iyo jawiga uu kolkaa ku jiro. Waa sababta qoyskii uu saddexda maalin iyo habeenkood uu ka maqnaa uu san u salaamin ee jikada iska galay.

Sanqadhiisa kolkay hooyadii maqashay ee dhawr jeer "Waa'ayo?" tiri, kol dambe "Waa Kayse!" Uga baxay ee ka aamusay. Nin sidaa dadkii ula dhaqmaya oo miisaanku ku yaryahay sidee buu ku qaabbili lahaa bisad yar oo isku marmartay?

Iminka waa ay is dhiibtay oo tabartii ayaa ka sii dhammaanaysa. Irdihii caawinaadda iyo badbaadada inay isa soo xidheen ayay istusisay. Dheecaan yar oo ay dhanka midig ka dareentay ayay isku dayday inay ogaato. Se ma awoodi karin inay isdhaqaajiso.

Waxay dareentay xanuun iyo olol daran oo cagaha hoose kaga soo bilaabmay. Kol qudha oo naqaskii u soo laabtay ayay qaylo afka jabsatay. Miyaaaaaaaw! Miyaaaaaw! Kayse, oo u haystay inay mar hore bahashu tagtay ayaa qayladeedii dhagaha farta galiyay. Deedna dhibsaday oo kal dhinac taallay ku halgaaday.

Kolka laga tago inay nefis u cabaadaysay, sidoo kale waxay is lahayd wuu kuu diirnaxayaa, oo malaha oohintaada iyo cabaadkaada ayaa damqin doona, se kashan maqiiqan kolkay aragtay ayay orod jabsatay. Goor ay boodday iyo si ay u boodday ayay garanwayday. Waxay xasuusatay bootintii maalintii

iyaga oo yaryar labo na meyd ka ahaayeen, iyadana dhagax la huwiyay.

Sidii hore ma aha oo lugaha ayay jiidaysaa. Maya, ee qaarka dambe oo dhan ayeey dhulka ku jiidaysaa! Dhaawaca soo gaaray jug kaliya waa uu ka cuslaa. Waxa ay ku dul dhacday oo maacuun kala duwan ahayd waxaa kamid ahaa mindi! Taa oo kellida ka gashay illaa iyo bawdadana jeexday.

Waxay sii jiitantaba waxay gashay jiq musqusha u dhawayd. Halkaa ayay nolosheeedii intii ugu dambaysay ku qaadatay. Waa taa gariirtay, sidii oo ay koronta haleeshay. Waa taa afarta addin soo kogeen, sidii oo ay qalal qabto. Waa taa naftu qabatay ee qaarka hoose ka soo gurantay. Waa taa xubin walba oo ay kasii baxdo naftu ay qabow baarida noqotay. Waa taa qaarka sare iyo sadrigeeda la soo gaaray. Waa taa indhuhu caddaadeen oo kor ku qalcmeen. Waa taa margiyada dhuunteedii soo wada baxeen sidii oo xarig lagaga xiray.

Waa taa afkeedii xumbo iyo dhiig buuxiyeen. Waa taa qunyar qunyar naftu uga socotay oo uga socotay, uga socotay illaa ay mar qudha gariirkii iyo dhaqdhaqaaqiiba joojisay ee wada qabowday. Waxaa isku mar ahaa neefsigeedii u dambeeyay iyo cantuugadiisii u dambeeyay ee uu afka u diro. Ham!

Dhammaad